

Waa Maxay WIDA Alternate ACCESS?

WIDA Alternate ACCESS waa imtixaan laga qaado ardayda dhigata fasallada K-12 ee la aqoonsaday inay yihiin barteyaal af Ingiriisi oo leh naafonimo garasho oo aad u weyn.

WIDA Alternate ACCESS waxa uu cabbiraa xirfadaha luqadda Ingiriisiga ee ardayda ee dhageysiga, akhriska, hadalka, iyo qorista.

Muxuu Ilmahaygu U Galayaa WIDA Alternate ACCESS?

Ilmahaaga waxaa la aqoonsaday inuu yahay barte af Ingiriisi. Barteyaasha Ingiriisiga waxay galaan imtixaan qiimeynaya heerka aqoonta luqadda Ingiriisiga sanad walba. Barteyaal badan oo af Ingiriisi waxay galaan imtixaanka WIDA ACCESS. Sababta ilmahaagu u galayo imtixaanka WIDA Alternate ACCESS waxay u badan tahay in:

- La aqoonsaday inuu leeyahay naafonimo garasho oo aad u weyn.
- Macallimiintiisu ay aaminsan yihiin in WIDA Alternate ACCESS, oo bixiya taageero dheeraad ah iyo fursado dheeraad ah oo looga jawaabo su'aalaha imtixaanka, uu si fiican ugu oggolaanayo ilmahaaga inuu muujiyo xirfadaha horumarsan ee luqadda Ingiriisiga.

Heerka Aqoonta Luqadda Ingiriisiga

Heerka aqoonta luqadda Ingiriisiga waa cabbir muujinaya halka ardaygu ka marayo geeddi-socodka barashada xirfadaha luqadda Ingiriisiga ee loo baahan yahay si uu ugu barto casharrada ku baxa Ingiriisiga. Marka ardaydu gaaraan heerarka ugu sarreeya ee aqoonta luqadda Ingiriisiga, uma baahna adeegyo taageero luqadeed si ay uga qaybqaataan casharrada ku baxa Ingiriisiga.



Sidee Loo Adeegsadaa Natiijooyinka WIDA Alternate ACCESS?

Imtixaanku waxa uu ka caawiyaa macallimiinta inay fahmaan in ardaydu leeyihiin xirfadaha luqadeed ee ay ugu baahan yihiin si ay si buuxda uga qaybqaataan fasalka. Barteyaasha Ingiriisiga ee leh naafonimo waxay baran karaan luqado iyo nidaamyo isgaarsiineed oo adag. Macallimiinta ilmahaaga waxay isticmaalaan natiijooyinka imtixaanka WIDA Alternate ACCESS marka ay go'aaminayaan sida ugu wanaagsan ee ilmahaaga wax loo baro.

Natiijooyinka imtixaanka sidoo kale waxay ka caawiyaan macallimiinta inay la socdaan horumarka ilmahaaga ee barashada Ingiriisiga tacliimeed, waxayna dugsiyada ka caawiyaan go'aaminta adeegyada taageerada luqadda Ingiriisiga ee la siinayo. Adiguna waxaad isticmaali kartaa macluumaadka imtixaanka si aad ilmahaaga ugu doodo dugsiga.

Diyaargarowga WIDA Alternate ACCESS

- Ilmahaagu uma baahna inuu wax u barto WIDA Alternate ACCESS. Imtixaanku waa fursad ardaydu ku muujinayaan dhammaan siyaabaha ay u fahmaan oo ay ugu hadli karaan Ingiriisiga.
- Ka hel tusaalooyin su'aalaha imtixaanka WIDA Alternate ACCESS bogga Alternate ACCESS Sample Items ee mareegta WIDA: wida.wisc.edu/assess/alt-access/preparing/sample-items.
- U diyaargarow maalinta imtixaanka adigoo hubinaya in ilmahaagu helo hurdo ku filan oo uu quraacdo.
- La hadal macallimiinta ilmahaaga oo weydii goorta aad heli doonto natiijooyinka imtixaanka, sida dugsiga ilmahaaga u isticmaalo natiijooyinkaas, iyo sida qoyskaagu uga taageeri karo ilmahaaga horumarinta luqadda Ingiriisiga ee guriga.

Su'aalaha Aad Weydiin Karto Macallimiinta Ilmahaaga

- Sidee loo diiwaangelinayaa oo loola soconayaa yoolalka horumarinta luqadda Ingiriisiga ee ilmahaaga?
- Goorma ayuu ilmahaagu galayaa WIDA Alternate ACCESS?
- Goorma ayaan heli doonaa natiijooyinka imtixaanka WIDA Alternate ACCESS ee ilmahaaga?
- Sidee ayaa natiijooyinka imtixaanka loogu adeegsadaa in ilmahaagu horumar ka sameeyo barashada Ingiriisiga tacliimeed?
- Sidee ayaad ku go'aamisaa goorta ilmahaagu joojinayo helista adeegyada luqadda Ingiriisiga?

